**Sijoogta ah loo waydiiyay su aalo ku saabsan masuulka noqoshada qof dhaqaalihiisa**

**Frequently Asked Questions About Conservatorship**

***Daabacaada cajiibka (Publication of MAGIC): waa Urur eegaya isbedelada sameeynta-go aanada.***

**What is a conservator**?
**Waa qofka ay maxkamad a wood u siisay inuu ka caawiyo qofkale xisaabaadkiisa ama hantidiisa qofkaasoo aan awoodin inuu maamulo dhaqaalihiisa.**
Qof masuul laga yahay, waa qof leh ( a conservator ) qof dhaqaalaha kala shaqeeya. Maxkamada waxay magacaabaysaa qof markay ogaadaan qofkaas inuusan iska caawinkarin xisaabaadka oo ku saabsan hantidiisa sababtoo ah xanuun awgiis, tusaale ahaan dhinaca maskaxda, Maskaxda looga jiro, dhaawac kasoogaaray maskaxda, iyo dhiigkarka oo markaas maskaxda ku dhuftay oo jirka hoowlgabkadhigay. Maxkamada waxay magacaabaysaa qof kuu maamula dhaqaalahaaga markii ay baahijirto si loogu baxsho baahi-daryeel, loona maamulo lacagta, ama loohelo dhaqaalaha ka maqan xalkaasna waa kan ugu muhiimsan.Qofkaas (conservator) oo matalaya hay-ad katirsan maxkamada, kaa soo leh aaminaad, masuliyad uu ku ilaaliyo kuna maamulo qofka hantidiisa, xinlna kasaaranyahay maxkamada maamulida hantidaas.

**Yaa noqonkara qofka ku matala inuu hantidaada maamulo? (Who can serve as a conservator**?)
Maxkamada ayaa magacaawda ayagoo eegaya danta qofka la-ilaalinaayo. Qofkaasna waxuu noqonkaraa Ehelkaaga, Saaxiibkaa, qof masuuliyad wayn meelkahaya, shirkad, hay-adaha aan u shaqeen inay faa-ido kahelaan sida kumuyunitiyada, iyo bangiyada.
Qaanuunka, qofka ku ilaalinaaya waa in laga baaraa dambiyaal, sixun ula dhaqmin macaamiil hadakahor, iyo taariikhdiisu inay ahaato mid uqalma qofkaas uu lashaqeenaayo.

**Waa maxay shaqada iyo awooda uu leeyahay qofka ilaalinaaya hantidaada?**
Qofkaas waxuu awood iyo shaqo leeyahay waxay maxkamadu udirtay kaliya. Qofka la-ilaalinaayo waa inuu lasocdaa sharciyada iyo awooda ay maxkamadu ay siisay qofka kuu shaqeenaya. Hanti ilaaliyuhu awood uma laha inuu qofka xukumo, waa inuu sharciga u hogaansanaadaa, ogaadana waxa ay shaqadiisu tahay, sida bixin lacagaha qofka loogu shaqeeyay, caawin qofka la ilaalinaayo, iyo waxii ku tiirsan; ilaali hantidiisa; aruurin iyo maamulin hantida;deen kabixin; aqbalid qandaraasyada; u codsasho waxtarka dawlada; kala wareegid awooda garyaqaanada, ama joojinta lacagihii horay uu u fasaxay hanti ilaaliyihii hore. Maxkamada waxaa kale oo ay ogolaankartaa, hanti ilaaliyuhu inuu iibinkaro waxii raasumaal kuu ah, sida guryaha, inuu dad ama shirkad kuu dacweenkaro, iyo inuu hantidaada kuu qorsheeyo.

**Sidee loo bilaabaa inaad masuuliyadaan qaado?**
Qofwalaba oo xiiseenaya, kana mid aha xubin qoyska ama saaxiib, inuu waydiiyaan maxkamada si loogu ogolaado. Maxkamada inay dhagaysato waaye waxaana loo baahanyahay in labaduba ay qaataan wakhti ay uga fekeraan inay raali ka-yihiin howshaas. Maxkamadaas oo maga caabaysa

abuukaate oo matalaya qofka la ilaalinaayo si loo dhagaysto. Marka la dhagaysanayo waxaa loobaahanyahay cadeen in qofkaani uu u baahanyahay qof masuulkanoqda. Howshaana waxay qaadanaysaa bilooyin.

**Yaabixinaayaa qarashkaas ilaaliyaha?**
Maxkamada, abuukaataha, iyo qarashkoodhan waxaa bixinaaya kan la-ilaalinaayo. Hadii uu san hanti lahayna qofka la ilaalinaayo uma baahna ama qof hantidiisa haya, sababtoo ah maxaa la-ilaaliyaa hantiba ma lahee. Laa kiin waxaad helikartaa xal ka fudud.

**Yaa masuul ka ah ilaaliyaha?**
Ilaaliyaha waxuu hoos imaanayaa maxkamada oo u sheegaysa masuuliyadiisa. Markii ay maxkamadu ay magacaawdo ilaaliyaha waa inuu soo gudbiyaa sanad walba hantida qofka uu masuulka ka yahay, waxii soogala iyo waxii kabaxaba oo ay cadeeyn la socoto. Xisaabaadkaas waxaa arki kara qofwalaba oo ay khusayso. Ilaaliyaha waxaa lagu dacweenkaraa qaybta ilaalinta dadwaynaha (Adult Protection Unit) markay musuqmaasuq iyo wax isdabamarin dhacdo.

**Xalkale maa jira oo ilaalin ah?**
Qoyskaaga oo aad ku kalsoontahay caawimaadna ka hesho iyo saaxiibo, awooda abuukaataha, dawladu ku amarto in dhaqaalagu siiyo, si toos ah biilkaaga loobixiyo ayadoo bangiga mareeysa, kuwa baxsha lacagaha Soshiyaal sakuuritiga, kuwa maamula askartii xiligii dagaalka, kuwa hawgabka noqday oo ka shaqeen jiray tariinada (railroads) meelahaanoo dhan waa meelo aad ka heli kartid mucaawino. Sidookale magaalada aad degantahay waxaa laga yaabaa inay leedahay maamulida lacagaha dadka dhaqaalahayar.

**Raadi qof xirfad fiican u leh sharciyada iyo talooyinka**
Minnesota Association for Guardianship and Conservatorship (MAGIC) waxay ku siinaysaa warbixin guud. Warqadahaan ha u isticmaalin talo sharci, laa kiin hadii aad u baahato Abuukaate, talo anaga si toos ah noogula soo xiriir si aanu u xalino dhibaatooyinkaaga.

**Minnesota Association for Guardianship & Conservatorship**
www.minnesotaguardianship.org